

Qarashka Billaha ah ee Badelka u ah Dabaajiga Buuxa ee Kirada –

Foomka Shaacinta

**WAXAA LAGA YAABAA INAAD DHIIIBTO QARASH BILE AH HALKII AAD KA DHIIBI LAHAYD
LACAGTA DAMAANADA AH.**

Lacagtaan maaha damaanad laguumana soo celin doono marka aad ka guurto guriga. Marka aad dhiibto qarashkaan, mulkiilaha guriga ayaa kuu fasaxayaa inaad u guurto qayb kamid ah guriga adoon dhiibin lacag damaanada ah. Haddii aadan dhiibin dhammaan lacagaha ama aad waxyeelo u gaysato dhismaha marka lagasoo tago murmuraxa caadiga ah ee ka dhalanaaya isticmaalkiisa caadiga ah, mulkiilaha guriga, shirkada caymiska mulkiilaha guriga, ama dayn aruuriye ayaa kaa dooni kara inaad dhiibto cadadka aadan bixin, ayna ku jiraan qarashaadka dayactirka waxyeelooyinka ka badan nabarada caadiga ah ee ka dhasha isticmaalka caadiga ah ee guriga.

Sharciga gobalka Washington ayaa kuu ogolaanaaya saddex dookh oo kaladuwani:

- (1) Inaad dhiibto lacagta buuxda ee damaanada marka aad saxiixdo heshiiska kirada.
- (2) Haddii ay jirto, bixinta damaanada buuxda iyo qarashaadka kale ee soo guurista oo saddex qaybood ah (hoos ka fiiri xog dheeraad ah).
 - qaar kamid ah sharciyada maxaliga ah ayaa ku siinaaya waqtii intaas ka badan.
- (3) Haddii uu mulkiilaha gurigu kuu ogolaado, bixinta lacagta damaanad dhaafka ayaa kuu furan halkii aad damaanad ka bixin lahayd. Haddii aad dookhaan doorato, ma bixin doontid damaanad ama lacagta kirada bisha ugu danbaysa oo hormaris ah. Qarashkaaga bil kasta ee soo laalaabta ayaa noqon doona \$ _____ OO DHEERI KU AH lacagta kirada ee bil kasta, halkii aad ka dhiibi lahayd lacagta damaanada ah iyo/ama kirada bisha ugu danbaysa oo dhan \$ _____.

HADDII AAD DOORATO INAAD DHIIIBTO LACAGTA BADELKA U AH DAMAANADA HORMARISKA AH, WAA TAN CADADKA AAD DHIIIBAYSO MUDADA AAD KIRADA KU DAGAN TAHAY MARKA LOO EEGO LACAGTA DAMAANADA AH EE HALKA MAR LA DHIIBO:

Qarashka Bil kasta ee aan Laguu Celin Doonin ee Badelka Damaanada: _____	Lacagta Damaanada ah ee Laguusoo Celin doono Muddo Kadib: _____
Qarashka Guud ee Bil kasta Muddada aad Kirada Ku dagan tahay: _____	_____

Haddii kiradaadu dhammaato aadana dhiibin kirada ama lacago kale oo heshiiska ku qornaa, aadana dhiibin qarashka dayactirka ciladaha ka baxsan kuwa caadiga ah ee isticmaalka guryaha, caymiska ayaa lacagta siin doona mulkiilahaaga:

\$_____ Kirada iyo qarashaad kasta oo aan la dhiibin, iyo

\$_____ Waxyeelooyin kasta

Caymiska guud: \$_____

MUHIIM:HADDII AAD DOORATO INAAD DHIIBTO QARASHKA SOO NOQNOQANAAYA EE BIL KASTA BADELKA DAMAANADA BUUXDA:

- (1) CAYMIS KAMA HYSATID SHIRKADA UU CAYMISKA KA IIBSADAY MULKIILAHA GURIGA ADOO ADEEGSANAAYA QARASHKA AAD BIXISO;
- (2) GUNNO KAMA HESIID WAX CAYMIS AH AMA GUNNOOYIN LAGU BIXIYO GUNNOOYINKA CAYMISKA MULKIILAHA GURIGU UU IIBSADO ASAGOO ADEEGSANAAYA QARASHKAAGA; IYO
- (3) WAXAAD WALI MASUUL KA TAHAY INAAD DHIIBTO KIRADA IYO DHAMMAAN QARASHAADKA HESIIASKA KIRADA KU QORAN, AYNA KU JIRAAN QARASHAADKA DAYACTIRKA WAXYEELOOYINKA KA BAXSAN DILDILAACA CAADIGA AH EE ISTICMAALKA GURYAH.

Mulkiilaha guriga ayaa lacagta kaa dalban kara kahor intuusan sheegashada u gudbin shirkada caymiska. Haddii aad ku fashilanto inaad siiso mulkiilaha kirada ama qarashaadka kale ee aad bixin ama lacagaha dayactirka waxyeelooyinka ka baxsan dilaacyada caadiga ah ee isticmaalka guriga, ayna shirkad caymis siiso mulkiilaha lacagta, markaas shirkada caymiska ayaa kaa codsan karta inaad lacagta ay siisay mulkiilaha guriga u celso shirkada.

Haddii aad doorato inaad bixiso lacagta bil kasta badalka dabaajiga buuxda, markaas waxaad xaq u leedahay markaad doonto inaad siiso mulkiilaha lacagta dabaajiga ah oo dhan \$_____ aadna joojiso bixinta lacagta joogtada ah laga bilaabo bisha xigta bisha aad dhiibto dabaajiga buuxa.